

## Guudmarka Gunada Caruurta Da'da Dugsiga ee Dayrta ee DCYF

Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxay bixisaa guno hal mar ah oo lacag ah oo ay siisaa bixiyayaasha liisanka haysta ee caruurta gaadhay da'da dugsiga ee u adeega caruurta da'da dugsiga gaadhay ee qaata kaabista.

### Yaa u qalma?

Wixii bixiye daryeelka ilmaha ah ee Gobolka Washington ee siiya daryeel caruurta gaadhay da'da dugsiga ee qaata kaabista Febraayo, Maarso, iyo Abriil 2021 oo dalbaday lacagta kaabista ugu danbayn Juun 30, 2021.

### Sidee Lacagta La ii Siinayaa?

DCYF waxay dul mari doontaa xadiga kaabista caruurta gaadhay da'da dugsiga ee bixiyaha oo ay la eegi doontaa xadiga kaabista waxbarashada dugsiga kahor ee deegaanka si ay u bixiso hal mar lacagta "baaqiga" ah ee Febraayo, Maarso, iyo Abriil 2021. Haddii aad tahay qof ka qaybgalaya barnaamijka Early Achievers kaasoo helaya magdhow heerar kala duwan leh (Tiered Reimbursement, TR) oo loogu talagalay caruurta jirta da' dugsiyeedka, tani waxaa ka mid noqon doona qiimo "farqi ah" oo loogu talagalay TR.

Lacagta gunada waxaa lagu bixin doonaa Nidaamka Bixinta Lacagta Adeega Bulshada (Social Service Payment System, SSPS). Lacagta waxaa loo bixin doonaa qaab lamid ah qaabka wakhtigan loo bixiyo lacagaha kaabista:

- Waxaa lagu bixiyahaa Adeegyada Boosta Maraykanka waxaana loo diri doonaa cinwaanka lambarka SSPS ku jira; ama
- Waxaa toos elektoroonig ahaan loogu shubi doonaa xisaabta bangiga hadii hore uu ugu jiro SSPS. (Fadlan ogsoonaw hadii aanad hore kayd ugu lahayn SSPS, suurto gal maaha inaad u samaysato kayd gunadan, oo waxaa gunada laguugu soo diri doonaa boosta.)

### Wakhtiga

- Badhtamaha-Abriil - Macluumaadka bixiyaha
- Horaanta Maay - Macluumaad dheeraad ah oo bixiyaha ah
- Badhtamaha-Juun - Lacagta kowaad ee loosii daynayo bixiyayaasha dalbaday Maay 31
- Badhtamaha-Julaay - Lacagta ugu danbaysa waxaa loosii dayn doonaa bixiyayaasha kadib marka ay dalbadaan Maay 31 iyo ugu danbayn Juun 30

### Tusaalaha Bixinta Baaqiga

Xadiga gunada caruurta gaadhay da'da dugsiga waxaa lagu xisaabin doonaa iyada oo la adeegsanayo lambarka tirada bixiyuhu uu u qalmo in la siiyo oo lagu dhuftay baaqiga xadiga waxbarashada dugsiga kahor iyo xadiga caruurta gaadhay da'da waxbarashada ee bixiyaha. Xadigan waxaa kadibna lagu dhufaa xadiga qaybaha guditaanka bixiyaha si loo ogaado gunada. Xisaabtan waxaa loo xisaabiyaa ilmo kasta bil kasta oo waxaa la iskugu daraa hal lacag bixiye kasta bishii.

#### Tusaale:

Bixiyaha Deegaanka 2 ee dalbaday lacagta 22 maalmood oo buuxa oo ilmaha da'da waxbarashada ah Maarso, ee la siiyay lacagta oo dhamaystiran oo 22 maalmood oo buuxa ah. Xadiga caruurta da'da dugsiga ee bixiyuhu waxaa weeye \$29.41 halkii midba maalinta oo dhan. Deegaanka 2 xadiga waxbarashada dugsiga kahor waxaa weeye \$30.86 halkiiba maalinta oo dhan. Lacagta rasmiga ah ee gunada ilmuhu waxaa weeye \$31.90. Haddii bixiyaha lagu qiimeeyo heerka 3 ee Early Achievers ama 3+, waxaa taas lagu dhufaa 12% oo waxaa lagu daraa \$3.83.

$22 \times (\$30.86 - \$29.41) = \$31.90$

$\$31.90 \times 12\% = \$3.83$

Wadarta gunada ilmakan waxaa weeye:  $\$31.90 + \$3.83 = \mathbf{\$35.73}$

### Yaan Ula Xidhiidhi Karaa wixii Su'aalo ah?

DCYF waxay leedahay shaqaale u gaar ah oo ka jawaaba su'aalaha. Fadlan iimeel u dir [dcyf.covidgrantinfo@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.covidgrantinfo@dcyf.wa.gov) wixii su'aalo ah.